(1)

# Qoyska waa deganaan iyo kalgacal

Mahad Allaa iska leh, Allaha Caalamka oo kitaabkiisa Kariimka ku yiri:
{هُوَ الَّذِي خَلَقَكُم مِّن نَّفْسٍ وَاحِدَةٍ وَجَعَلَ مِنْهَا زَوْجَهَا لِيَسْكُنَ إِلَيْهَا}

**(Eebe waa kan idinka abuuray naf kaliya, kana yeelay xaggeeda haweenaydiisii inuu weheshado)**

Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame
Intaas kaddib:

Qoyska waa aasaaska bulshada, iyo salka dhismaheeda, is haysigiisa iyo xasilloonidiisa ayay bulshada ku xasilaysaa kuna adkaanaysaa; sidaa awgeed islaamka wuxuu si xoog ugu dadaalay dhismaha qoyska, taasoo keenaysa deganaan iyo kalgacal iyo naxariis qoyska dhexdooda, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{وَمِنْ آيَاتِهِ أَنْ خَلَقَ لَكُمْ مِنْ أَنْفُسِكُمْ أَزْوَاجًا لِتَسْكُنُوا إِلَيْهَا وَجَعَلَ بَيْنَكُمْ مَوَدَّةً وَرَحْمَةً إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَآيَاتٍ لِقَوْمٍ يَتَفَكَّرُونَ}.**

**(waxaa ka mid ah Calaamooyinkiisa inuu idiinka abuuray naftiina Haween si aad isugu xasishaan, yeelayna dhexdiina**

**isjacayl iyo naxariis, taasina waxaa ugu sugan Calaamad qoomkii fikiri)**

Qofka fiirfiiriya aayadda qiimaha badan wuxuu ogaanayaa in Alle (caza wa jalla) uu caddeeyay in dhismaha qoyska uu ka mid yahay aayadahiisa waaweyn, wuxuu ka dhigay Alle guurka xasillooni, maxaayeelay ninka wuxuu ku xasilaa xaaskiisa, naagtana waxay ku xasilaysaa ninkeeda, Allaha xaqqa (SW) wuxuu ka dhigay naxariista iyo kalgacalka aasaaska dhismaha qoyska, kalgacalka waa: waxa keenaya dhaqanka wanaagsan, labada is qaba way isugu dulqaadanayaan waxa kasoo fakado kan kale, ama dabeecadda ay isku khilaafaan, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(لا يَفْرَكْ مؤمنٌ مؤمنةً؛ إنْ كَرِهَ منها خُلُقًا، رَضِيَ مِنهَا آخَرَ)،**

**(Nin mu'min yuuna ka caroonin haweeney mu'minad ah haddii uu dabci ku naco mid kale ayuu kaga raalli noqonayaa)**

Marka qoyska wuxuu ku taagnaanaa macaanida dabciga fiican, dhaqanka wanaagsan, iyo dhimrinta, qoyska degan oo is haysta waxaa ka dhasha sifooyin fiifiican, iyo xaalado wanaagsan, iyo ubad suubban, gurigaas farxad ayaa ku dhex faafayso.

Sidii loo helo xasillooni iyo kalgacal xagga qoyska waxaa habboon in lagu dhaqmo arrimo ay ka mid yihiin: dhaqanka wanaagsan, iyo in si fiican layskula dhaqmo, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{وَعَاشِرُوهُنَّ بِالْمَعْرُوفِ}**

**(Wanaag kula dhaqma haweenka)**

Wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee)

**(اسْتَوْصُوا بِالنِّسَاءِ خَيْرًا)،**

**(Khayr kula dardaarma haweenka)**

Wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee)

**(خَيْرُ نِسَائِكُمْ مَنْ إِذَا نَظَرَ إِلَيْهَا زَوْجُهَا سَرَّتْه، وَإِذَا أَمَرَهَا أَطَاعَتْهُ، وَإِذَا غَابَ عَنْهَا حَفِظَتْهُ فِي نَفْسِهَا وَمَالِهِ).**

(**Haweenkiina waxaa ugu khayr badan midda markuu ninkeeda eego ay farxadgaliso, markuu amrana adeecda, markuu ka maqanaadana nafteeda iyo maalkiisa ilaalisa**)

Waxaa ka mid ah ninka inuu biilo qoyskiisa inuu siiyo deegaan iyo cunto iyo labis, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{وَعَلَى الْمَوْلُودِ لَهُ رِزْقُهُنَّ وَكِسْوَتُهُنَّ بِالْمَعْرُوفِ}،**

(**Kan wax loo dhalayna waxaa saaran cunadooda iyo arradbaxooda si fiican**)

wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{لِيُنفِقْ ذُو سَعَةٍ مِّن سَعَتِهِ}**

(**Haka nafaqeeyo (masruufo) midka awood xoola leh awooddiisa**)

Wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee)

**(أَفْضَلُ الصَّدقةِ مَا كَانَ عَنْ ظَهْرِ غِنًى، واليَدُ العُليا خيرٌ من اليَدِ السُّفلَى، وَابْدَأْ مَنَ تعولُ)،**

(**Sadaqo waxaa ugu fiican wixii laga kaaftoomo, gacanta sare waxay ka khayr badan tahay midda hooseysa ka bilow dadka aad biilayso**)
Wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee)

**(كَفَى بِالْمَرْءِ إِثْمًا أَنْ يُضَيِّعَ مَنْ يَعُولُ).**

(**Qofka waxaa ku filan inuu dayaco cidda uu quudinayo**).

Waxaa ka mid ah in la qariyo sirta ka dhexaysa ninka iyo xaaskiisa, waxay isu yihiin astur, in la faafiyo sirta diinta iyo akhlaaqda toosan raalli kama aha, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(إِنَّ من أشَرَّ النَّاسِ عِنْدَ اللهِ مَنْزِلَةً يَوْمَ الْقِيَامَةِ: الرَّجُلَ يُفْضِي إِلَى امْرَأَتِهِ، وتُفْضِي إِلَيْهِ، ثم يَنْشُرُ سِرَّهَا).**

**(Dadka waxaa ugu shar badan darajo ahaan Alle agtiisa nin naagtiisa u tagay iyadana ay u tagtay kaddib sirteeda faafinaya)**

Waxaa ka mid ah: in laysla wadaago barbaarinta ilmaha, si wanaagsan in loo barbaariyo, kuma eka doorka labada is qaba barbaarinta ilmaha inay cunto iyo cabbitaan siiyaan iyo amuuraha maaddiga kaliya, balse barbaarinta waa inay u gudubtaa akhlaaqda oo naftooda lagu beerayo, taasoo ka dhigaysa kuwa bulshada inay kor u qaadaan, markaas ay noqdaan kuwa farxad u ah aabbayaashooda iyo hooyooyinkooda adduun iyo aakhiraba, wuxuu leeyahay Alle (SW):

{وَالَّذِينَ يَقُولُونَ رَبَّنَا هَبْ لَنَا مِنْ أَزْوَاجِنَا وَذُرِّيَّاتِنَا قُرَّةَ أَعْيُنٍ وَاجْعَلْنَا لِلْمُتَّقِينَ إِمَامًا}،
**(waana kuwa dhihi Eebow naga sii haweenkanaga iyo caruurtanada wax ishu ku qabowsato, noogana yeel kuwa dhawrsada imaam)**

Wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee)

**(إِذَا مَاتَ ابنُ آدم انْقَطَعَ عَنْهُ عَمَلُهُ إِلَّا مِنْ ثَلَاثٍ: صَدَقَةٍ جَارِيَةٍ، أو عِلْمٍ يُنْتَفَعُ بِهِ، أَوْ وَلَدٍ صَالِحٍ يَدْعُو لَهُ)،**

(**Qofka markuu dhinto camalkiisa wuu go'ayaa seddex waxyaabood mooyee, sadaqo soconaysa, iyo aqoon laga faa'idayo, iyo wiil suuban oo usoo duceynaya**), qoyska siduu ilmaha ugu dadaalo ayaa laga rabaa inuu ugu dadaalo xuquuqda waalidka wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{وَقَضَى رَبُّكَ أَلَّا تَعْبُدُوا إِلَّا إِيَّاهُ وَبِالْوَالِدَيْنِ إِحْسَانًا}،**

(**Wuxuu faray rabbigaaga inaydaan caabudin isaga mooyee iyo inaad u samo fashaan labada waalid samo falid**)
Waxaa la helayaa xasillooni iyo deganaan, farxad qoyska oo dhan ay helayaan.

Waxaa ka mid ah: inay ka wada tashadaan qoyska arrimaha nolosha, taas waxay keenaysaa qof kaste iyaga ka mid ah inuu dareemo doorkiisa iyo qiimaha uu leeyahay, wuxuu kala tashaday nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) xaaskiisa Ummu salama (Alle raalli haka noqdee) sulxu

Alxudeybiya, wuuna ku raacay raallina wuu ka noqday, khayrkana wuxuu ku jiray taladeeda (Alle raalli haka noqdee)

****

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato midka lagu khatimay anbiyada iyo rususha sayidkeenna Muxammad (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), iyo dhammaan ehelkiisa iyo asxaabtiisa.

Waxaan shaki ku jirin inay door weyn ka qaadanayaan reerka lamaanaha ilaalinta qoyska, iyo sugnaanshihiisa, iyadoo la taageerayo jacaylka iyo tixgalinta iyo xasilloonida iyo kalgacalka ka dhexeeyo, iyo in la tixgaliyo arrimaha u gaarka ah, khilaafkoodana lagu xalliyo nasteexo iyo hagaajin, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{وَقُل لِّعِبَادِي يَقُولُوا الَّتِي هِيَ أَحْسَنُ إِنَّ الشَّيْطَانَ يَنزَغُ بَيْنَهُمْ إِنَّ الشَّيْطَانَ كَانَ لِلْإِنسَانِ عَدُوًّا مُّبِينًا}،**

(**waxaad ku dhahdaa Addoomadayda ha dheheen sida u fiican, Shaydaanku wuu fasaadin dhexdiinnee, Shaydaanna Dadka col cad buu u yahay**.)

Wuxuu leeyahay Alle (caza wa jalla):

**{وَإِنْ خِفْتُمْ شِقَاقَ بَيْنِهِمَا فَابْعَثُوا حَكَمًا مِّنْ أَهْلِهِ وَحَكَمًا مِّنْ أَهْلِهَا إِن يُرِيدَا إِصْلَاحًا يُوَفِّقِ اللَّهُ بَيْنَهُمَا إِنَّ اللَّهَ كَانَ عَلِيمًا خَبِيرًا}،**

**(Haddaad ka cabsataan iskhilaafka dhexdooda u bixiya garsoore ehelkiisa ah iyo garsoore ehelkeeda ah, hadday**

**doonaan wanaajinna Eebe wuu iswaafajin dhexdooda, Eebana waa oge xeeldheer**)

Maxaa u malaynasaa wiilasheena iyo gabdhaheena iyo qaraabadeena.
Maxaa inooga baahi badan inaan keenno xasillooni iyo kalgacal guryaheena, ilaa jacayl iyo isku xirnaan iyo xasillooni laga dhex helo bulshada oo dhan.

**Eebow naga sii haweenkanaga iyo caruurtanada wax ishu ku qabowsato, noogana yeel kuwa dhawrsada imaam**